# مفهوم العمل الصالح والعمل السيئ

## Waxa laga wado falka suubban iyo falka xun

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(مَّنْ عَمِلَ صَالِحًا فَلِنَفْسِهِ وَمَنْ أَسَاءَ فَعَلَيْهَا وَمَا رَبُّكَ بِظَلَّامٍ لِّلْعَبِيدِ)

(**Qofkii camal fiican fala wuxuu u falay Naftiisa, qofkii xumaan fala wuxuu dhibay Naftiisa, rabbigaagana ma aha dulmiyaha Addoomada**), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa oo yiri asoo ka warinaya rabbiga cisada leh:

**(... يَا عِبَادِي ، إِنَّمَا هِيَ أَعْمَالُكُمْ أُحْصِيهَا لَكُمْ ، ثُمَّ أُوَفِّيكُمْ إِيَّاهَا ، فَمَنْ وَجَدَ خَيْرًا فَلْيَحْمَدِ اللَّهَ ، وَمَنْ وَجَدَ غَيْرَ ذَلِكَ فَلَا يَلُومَن إِلَّا نَفْسَه)**

(**... addoomahaygiyow, waa uun falakiina oon idin koobayo, kaddibna aan idin oofinayo, qofkii khayr la kulmo Alle haku mahdiyo, qofkii wax kale la kulmana yuuna eedin naftiisa mooyee),** Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Alle wuxuu sharfay aadanaha wuxuu ku abuuray gacantiisa sida ugu fiican, wuxuuna ku afuufay ruuxdiisa, wuxuu ku soocay caqli, malaa'igtana wuu u sujuudsiiyay, waxa kaste koonka ku suganna wuu u sakhiray, in badan khalqigiisa ka mid ahna wuu ka fadilay wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

(وَلَقَدْ كَرَّمْنَا بَنِي ءَادَمَ وَحَمَلْنَاهُمْ فِي الْـبَرِّ وَالْبَحْـرِ وَرَزَقْنَـاهُم مِّـنَ الطَّيِّبَـاتِ وَفَضَّلْنَاهُمْ عَلَى كَثِيرٍ مِّمَّنْ خَلَقْنَا تَفْضِيلاً)

(**Dhab baanu u sharrifnay binii aadamka waxaana ku xambaarnay barriga iyo baddaba waxaana ku arsaaqnay wanaag, waxaana ka fadilnay wax badan oo ka mida waxaan abuurnay fadilaad**).

Maxaayeelay aadanaha wuxuu qaaday amaano loo bandhigay samadaha iyo dhulka iyo buuraha oo ay diideen inay qaadaan wayna ka baqeen, waa amaanada tagliifka oo keenaysa in la camalfalo, dhulkana la camiro iyadoo cibaadada waajibkana la gudanayo, wuxuu leeyahay Alle:

{فَإِذَا قُضِيَتِ الصَّلَاةُ فَانتَشِرُوا فِي الْأَرْضِ وَابْتَغُوا مِن فَضْلِ اللَّهِ وَاذْكُرُوا اللَّهَ كَثِيرًا لَّعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ}

(**Markase salaadda la dhammeeyo dhulka ku kala faafa, dalbana (doona) khayrka Alle, Ilaahayna xusa in badan waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaan**).

Muslinka waxaa ku habboon inuu ogaado wax kaste uu ku samaynayo noloshiisa inuu ku sugnaanayo miisaanka xasanaadkiisa ama xumaantiisa, wuxuu leeyahay Alle:

{فَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ خَيْرًا يَرَه * وَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ شَرًّا يَرَه}

(**Ruuxiise wax yaroo khayra fala wuu arki * Kiise wax yar oo shar fala wuu arki**), wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{يَوْمَ تَجِدُ كُلُّ نَفْسٍ مَّا عَمِلَتْ مِنْ خَيْرٍ مُّحْضَرًا وَمَا عَمِلَتْ مِن سُوءٍ تَوَدُّ لَوْ أَنَّ بَيْنَهَا وَبَيْنَهُ أَمَدًا بَعِيدًا وَيُحَذِّرُكُمُ اللَّهُ نَفْسَهُ وَاللَّهُ رَءُوفٌ بِالْعِبَادِ}

**((Xusuuso) Maalinta ay heli Nafkastaa waxay Camal fashay oo Khayr ah oo la soo xaadiriyay (la keenay) waxay Camal Fashay oo Xumaan ahna waxay jeclaan in la yeelo iyada iyo isaga dhexdooda muddo dheer, wuxuuna idiinka digi Eebe Naftiisa (Ciqaabtiisa) Eebana waa u Naxariistaha Adoomadiisa**), waxa camalka laga wado waxaa soo galaya: wax kaste uu samaynayo aadanaha oraah iyo falba, camalka suubban waxaa shardi ah inuu dar Alle ahaado iyo inuu ahaado mid sugan wuxuu leeyahay Alle:

{وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا اللَّه مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ حُنَفَاءَ وَيُقِيمُوا الصَّلَاةَ وَيُؤْتُوا الزَّكَاةَ وَذَلِكَ دِينُ الْقَيِّمَةِ}

(**Dadkana waxaan Eebe caabudiddiisa ahayn lama farin iyagoo u kali yeeli Eebe Diinta iyagoo toosan,**

**Salaaddana oogi Zakadana bixin, Saasina waadiinta toosan**), wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(إِنّ الله يُحِبُ إذا عَمِل أحَدُكُم عَمَلاً أنْ يُتْقِنَهُ)**

(**Alle wuxuu jecel yahay midkiina markuu shaqaynayo inuu sugo**).

Waxaan shaki ku jirin waxa laga wado camalka suubban inuu ballaaran yahay, waxaa soo galaya wixii Alle ku waajibiyay addoomihiisa, salaad iyo soon iyo sako iyo xaj iyo digri iwm, taas waa aasaas waxaa lagma marmaan ah qofka muslinka inuu sameeyo, wuxuu leeyahay Alle:

**(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا ارْكَعُوا وَاسْجُدُوا وَاعْبُدُوا رَبَّكُمْ وَافْعَلُوا الْخَيْرَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ)**

(**Kuwa (Xaqa) Rumeeyow Rukuuca oo Sujuuda oo Caabuda Eebihiin Falana Khayrka waxaad u Dhawdihiin inaad Liibaantaane**), wuxuu leeyahay subxaanahu:

{وَأَقِيمُوا الصَّلَاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ وَأَطِيعُوا الرَّسُولَ لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ}

(**Salaadda ooga sakadana bixi Alle iyo rasuulka Adeecana waxaad u dhawdihiin in laydiin Naxariistee**), Wuxuu leeyahay rasuulka:

**(الطُّهُورُ شَطْرُ الإِيمَانِ ، وَالْحَمْدُ لِلَّهِ تَمْلأُ الْمِيزَانَ ، وَسُبْحَانَ اللَّهِ وَالْحَمْدُ لِلَّهِ تَمْلآنِ – أَوْ تَمْلأُ – مَا بَيْنَ السَّمَوَاتِ وَالأَرْضِ ، وَالصَّلاَةُ نُورٌ، وَالصَّدَقَةُ بُرْهَانٌ ، وَالصَّبْرُ ضِيَاءٌ ، وَالْقُرْآنُ حُجَّةٌ لَكَ أَوْ عَلَيْكَ ، كُلُّ النَّاسِ يَغْدُو ، فَبَائِعٌ نَفْسَهُ ، فَمُعْتِقُهَا ، أَوْ مُوبِقُهَا)**

(**Dahaarada waa nuska iimaanka, alxamdulillaah miisaanka ayay buuxinaysaa, subxaanallaah iyo walxamdulillaah waxay buuxinayaan inta u dhexeysa samadaha iyo dhulka, salaadda waa nuur, sadaqada waa daliil, sabarkana waa iftiin, quraankana waa xujo kuu sugan ama dushaada saaran, mid kaste wuu kalahaa naftiisa ayuu iibiyaa wuu xoreynaa ama wuu halaagaa**).

Waxaa ka mid ah camalka suubban oo muslinka laga rabo inuu qaato: runta iyo hadalka wanaagsan iyo faafinta salaanta iwm. oo qofka lagu jeclaan karo, wuxuu yiri Alle:

{وَقُلْ لِعِبَادِي يَقُولُوا الَّتِي هِيَ أَحْسَنُ}

(**Ku dheh Addoomadayda ha dheheen sida u fiican**), wuxuu leeyahay rasuulka

**(إِنَّ أَحَبَّكم إِلَيَّ أَحَاسِنُكُمْ أَخْلاقًا ؛ الْمُوَطَّئُونَ أَكْنَافًا ، الَّذِينَ يَأْلَفُونَ وَيُؤْلَفُونَ...)**

(**Kuwiina loogu jecel yahay xagayga waa kuwa ugu akhlaaq fiican, oo degan oo dadka jecel iyagana la jecel yahay**), nabiga wuxuu ku caddeeyay xaalka mu'minka oraahdiisa:

**(وَالَّـذِي نَفْسُ مُحَمَّـدٍ بِيَـدِهِ ، إِنَّ مَثَـلَ الْمُـؤْمِنِ لَكَمَثَـلِ النَّحْلَـةِ ؛ أَكَلَتْ طَيِّبًا ، وَوَضَعَتْ طَيِّبًا ، وَوَقَعَتْ فَلَمْ تَكْسِر ، ولم تُفْسِدْ).**

(**Waxaan ku dhaartay Allaha nafta Muxamed ay gacantiisa ku jirto, mu'minka waa sida shinnida oo kale, waxay cuntay wax wanaagsan waxay dhigtay wax wanaagsan, way dhacday mana jabinin mana halleynin**).

Camalka suubban kuma koobna hal dhinac, balse waa wax kaste oo xaqiijinaya insaaniyada, kaalinna ka qaadanaya dhisidda bulsho isku xiran, oo fiican oo jacayl iyo iskaashi ka dhexeeya, iyo qiyamka ismasaamaxaadda iyo naxariista waa camal suubban, Islaamka wuxuu ka dhigay insaanka marka uu camalkiisa aadayo siduu xaaraanta uga dhowrsado oona dhididkiisa ka quudiyo familkiisa iyo carruurtiisa inuu qabanayo camal suubban oo laga abaalmarinayo, wuxuu ku tiriyay nabiga inuu yahay midka ku sugan jidka Alle, markuu soo maray nin nabiga oo ay arkeen asxaabtiisa kartidiisa iyo firfircoonidiisa ayay dhaheen: rasuulkii allow kan hadduu dar Alle ahaan lahaa, wuxu yiri rasuulka:

**(إِن كَانَ خَرجَ يَسعَىَ عَلىَ ولدِه صِغارًا فَهُوَ فِي سَبيلِ اللهِ ، وَإِن كَانَ خَرجَ يَسْعَى عَلى أبوَيْن شيخَيْن كبيرَيْن فَهُوَ فِي سَبيلِ اللهِ ، وإِن كَان خَرجَ يَسعَى عَلى نفسِهِ يعفُّها فهو فِي سبيلِ اللهِ ، وَإِن كَانَ خَرجَ يَسعَى رِيَاءً وَمُفاخَرةً فَهُوَ فِي سَبيلِ الشَّيطانِ)**

(**Hadduu usoo baxay ilmihiisa yaryar isduu ugu shaqeeyo wuxuu ku sugan yahay jidk Alle, hadduu usoo baxay asoo u ordaya waalidiin da' ah wuxuu ku sugan yahay jidka Alle, hadduu usoo baxay inuu naftiisa dhowro wuxuu ku sugan yahay jidka Alle, hadduu usoo baxay istus iyo faan wuxuu ku sugan yahay jidka shaydaanka**).

Waxaa inoogu sugan rasuulka Alle kudayasho wanaagsan, waa shaqeyn jiray ehelkiisana wuu u adeegi jiray, waxay leedahay hooyada mu'miniinta Caa'isha - Ilaahay raalli haka noqdee -: nabiga wuxuu ahaa mid kabtiisa sameysto maradiisana tosha gurigiisana wuxuu uga shaqeyn jiray sida midkiina gurigiisa uga shaqeeyo, wuxuu leeyahay:

**(إِذَا أَنْفَقَ الرَّجُلُ عَلَى أَهْلِهِ نفقَةً يحتَسبُها ، فَهِي لَهُ صدقَةٌ)**

(**Ninka hadduu u siiyo ehelkiisa biil oo dar Alle sadaqo ayay u tahay**), wuxuu leeyahay:

(خَيْرُكُمْ خَيْرُكُمْ لِأَهْلِهِ، وَأَنَا خَيْرُكُمْ لِأَهْلِي)

(**Kiina ugu khayrka badan waa kan ehelkiisa ugu khayrka badan anigaa idinkaga khayr badan ehelkayga**).

Camalka suubban waxaa ka mid ah wax kastoo qofka ku anfacaya qofka kale, ha yaraado ama ha badnaado, maaddi ha ahaado ama macnawi, wuxuu leeyahay Alle:

{لَا خَيْرَ فِي كَثِيرٍ مِنْ نَجْوَاهُمْ إِلَّا مَنْ أَمَرَ بِصَدَقَةٍ أَوْ مَعْرُوفٍ أَوْ إِصْلَاحٍ بَيْنَ النَّاسِ وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ ابْتِغَاءَ مَرْضَاتِ اللَّهِ فَسَوْفَ نُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا}

(**Khayr ma leh wax badan oo faqooda ah, oon ahayn mid fara sadaqo ama wanaag ama hagaajin dadka dhexdooda, ruuxii fala saas asoo doonayo raalli ahaanshaha Alle waxaanu siin ajir weyn**) wuxuu yiri rasuulka:

(مَنْ كَانَ مَعَهُ فَضْلُ ظَهْرٍ فَلْيَعُدْ بِهِ عَلَى مَنْ لاَ ظَهْرَ لَهُ ، وَمَنْ كَانَ لَهُ فَضْلٌ مِنْ زَادٍ فَلْيَعُدْ بِهِ عَلَى مَنْ لاَ زَادَ لَهُ)

(**Qofka haysto gaadiid dheeraad qofkaan haysanin ha ugu deeqo, qofkii haysta sahay dheeraad ah ha ugu deeqo qofkaan haysanin**), wuxuu ku boorriyay wax badan ka mid ah waddooyinka khayrka, wuxuu yiri:

(إِنَّ أَبْوَابَ الْخَيْرِ لَكَثِيرَةٌ : التَّسْبِيحُ ، وَالتَّحْمِيدُ ، وَالتَّكْبِيرُ ، وَالتَّهْلِيلُ ، وَالْأَمْرُ بِالْمَعْرُوفِ ، وَالنَّهْيُ عَنِ الْمُنْكَرِ ، وَتُمِيطُ الْأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ ،

وَتُسْـمِعُ الْأَصَـمَّ ، وَتَهْـدِي الْـأَعْمَى ، وَتَـدُلُّ الْمُسْـتَدِلَّ عَلَـى حَاجَتِـهِ ، وَتَسْعَى بِشِدَّةِ سَاقَيْكَ مَعَ اللَّهْفَانِ الْمُسْتَغِيثِ ، وَتَحْمِلُ بِشِدَّةِ ذِرَاعَيْكَ مَعَ الضَّعِيفِ ، فَهَذَا كُلُّهُ صَدَقَةٌ مِنْكَ عَلَى نَفْسِكَ)

(**Albaabada khayrka way badan yihiin, tasbiixda mahdinta takbiirta, tahliisha, faridda wanaagga, reebidda munkarka, waxaad ka leexinaysaa wadda dhibka, waxaad maqashiinaysaa dhagoolaha, waxaad hanuuninaysaa indhoolaha, kan wax raadinayo ayaad dantiisa tusaysaa, awoodda lugahaaga ayaad ugu soconaysaa si aad u kaalmayso kan dhibban, awoodda dhudhumahaaga ayaad ugu xambaaraysaa kan taagta daran, waxaan oo dhan waa sadaqo naftaada aad ku sadaqaysanayso**), dhamaan waxay ka mid yihiin camalka suubban.

Waxaa ka mid ah: dhista iyo hagaajinta iyo cammiridda, islaamka siduu u arko camal kaste kaalin ka qaadanaya dhista bulsho korreysa waa aragti weyneyn iyo qiimeyn ah, waxaa kusoo arooray quraanka kariimka in ku dhow seddex boqol iyo lixdan aayad ka hadashay camalka, Alle wuxuu noo sheegay tusaalooyinka dadka camalka suubban sameyn jiraym wuxuu leeyahay Alle:

{هُوَ أَنشَأَكُم مِّنَ الْأَرْضِ وَاسْتَعْمَرَكُمْ فِيهَا}

(**Isagaana idiinka ahaysiiyey dhulka idinkuna camiray dhexdiisa**), kan wuxuu sugayaa in kuwa ka shaqeeya

beeraha iyo farsamada iyo ganacsiga ay leeyihiin ajar weyn dadaalka ay bixinayaan dartii, iyo farsamooyinka ka mid ah tiirarka nolosha sida sameynta birta oo kale, wuxuu leeyahay Alle:

{وَأَنْزَلْنَا الْحَدِيدَ فِيهِ بَأْسٌ شَدِيدٌ وَمَنَافِعُ لِلنَّاسِ}

(**Waxaana soo dajinnay birta iyadoo Shiddo ku dheehan tahay iyo nacfi dadka**), sameynta doomaha, wuxuu leeyahay Alle:

{فَأَوْحَيْنَا إِلَيْهِ أَنِ اصْنَعِ الْفُلْكَ بِأَعْيُنِنَا وَوَحْيِنَا}

(**Waxaana u waxyoonay ku Samee doon Ilaalintanada iyo waxyiganaga**), wuxuu leeyahay Alle asoo ka hadlaya sameynta dharka:

**{وَمِنْ أَصْوَافِهَا وَأَوْبَارِهَا وَأَشْعَارِهَا أَثَاثًا وَمَتَاعًا إِلَى حِينٍ}**

(**idinkana yeelay Suufkeeda iyo dhogarta (Geela) iyo dhogorta (Riyaha) Alaab iyo Maacuun tan iyo muddo**), wuxuu leeyahay:

{وَجَعَلَ لَكُمْ سَرَابِيلَ تَقِيكُمُ الْحَرَّ وَسَرَابِيلَ تَقِيكُمْ بَأْسَكُمْ }،

(**Idiinkana yeelay dhar idinka dhawra kulaylka iyo Qamiisbireed idinka dhawra (Dhibka) Dagaalka**), wuxuu leeyahay asoo ka hadlaya sameynta maqaarka:

{وَجَعَلَ لَكُمْ مِنْ جُلُودِ الأَنْعَامِ بُيُوتًا تَسْتَخِفُّونَهَا يَوْمَ ظَعْنِكُمْ وَيَوْمَ إِقَامَتِكُمْ}

(**Wuxuuna idinka yeelay harkaha xoolaha Guryo idiin fudud maalinta geediga iyo maalinta nagaadidaba**).

Kuma koobna camalka suubban wixii dadka wax u taraya kaliya balse wuu gudbaa si uu u gaaro wixii xayawaanka iyo manoolaha wax u taraya, markuu soo maray nabiga rati xayeesi ah, wuxuu yiri:

**(اتَّقوا اللَّهَ في هذهِ البَهائمِ المعجَمةِ ، فاركَبوها صالِحةً ، وَاتْرُكُوهَا صَالحةً)**

(**Alle kaga baqa xoolahan aan hadlin, fuula iyadoo fiican kana taga iyadoo fiican**), wuxuu leeyahay rasuulka:

**(بَيْنَمَا رَجُلٌ يَمْشِي بِطَرِيقٍ وَجَدَ غُصْنَ شَوْكٍ عَلَى الطَّرِيقِ فَأَخَّرَهُ ، فَشَكَرَ اللَّهُ لَهُ ، فَغَفَرَ لَه)**

(**Nin mar uu waddo ku socday wuxuu arkay laan qodax oo taalla jidka wuu ka leexiyay Alle ayaa ku shukriyay wuuna u dhaafay**), wuxuu leeyahay nabiga:

**(لَقَدْ رَأَيْتُ رَجُلًا يَتَقَلَّبُ فِي الْجَنَّةِ فِي شَجَرَةٍ قَطَعَهَا مِنْ ظَهْرِ الطَّرِيقِ ، كَانَتْ تُؤْذِي النَّاسَ)**

(**Nin ayaan arkay oo jannada ku gadgaddoomaya geed uu wadda ka gooyay dartii oo dadka dhibi jiray**)

Camalka xun waxaa soo galaya wax kaste Alle ka caraysiiya (cazza wajalla) oo aadanaha ka dhigaya mid wax fasahaadiya, wuxuu bilaabayaa inuu ka fogaado daacooyinka waajibka ku ah, iyo inuu sameeyo

munkarka iyo xumaanta sida caasinimada iyo ku xadgudubka hantida iyo sharafta waxaa ka mid ah: inuu qofka mas'uuliyadda familkiisa ka gaabiyo iyo daryeelka carruurtiisa iyo ku barbaarinta wanaagga, wuxuu leeyahay Alle:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا قُوا أَنفُسَكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا}

(**Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawra Naftiina iyo ehelkiinna naar**), wuxuu leeyahay rasuulka:

**(كَفى بِالمَرْءِ إِثْمًا أَنْ يُضَيِّعَ مَنْ يقُوتُ).**

(**Qofka waxaa ku filan inuu dayaco cidda uu quudinayo**).

waxaa ka mid ah: fasahaadinta dhulka oo lagu fasahaadiyo faafinta fikradaha wax dumiya iyo beenta iyo argagixinta dadka nabadda haysta, wuxuu yiri Alle:

{وَلاَ تُفْسِدُوا فِي الأَرْضِ بَعْدَ إِصْلاحِهَا}

(**Hana fasaadinina dhulka inta la wanaajiyay kadib**), wuxuu leeyahaya Alle:

{إِنَّمَا جَزَاءُ الَّذِينَ يُحَارِبُونَ اللَّهَ وَرَسُولَهُ وَيَسْعَوْنَ فِي الأَرْضِ فَسَادًا أَنْ يُقَتَّلُوا أَوْ يُصَلَّبُوا أَوْ تُقَطَّعَ أَيْدِيهِمْ وَأَرْجُلُهُمْ مِنْ خِلافٍ أَوْ يُنفَوْا مِنَ الأَرْضِ ذَلِكَ لَهُمْ خِزْيٌ فِي الدُّنيَا وَلَهُمْ فِي الآخِرَةِ عَذَابٌ عَظِيمٌ}

(**Abaalka kuwa la Dagaalama Eebe iyo Rasuulkiisa oo la Socda Dhulka Fasaad waa in la Dilo ama la Waro, ama loo gooyo Gacmahooda iyo Lugabooda Isdhaaf, ama laga Fogeeyo Dhulka, arrintoodaasna waa inay Mudan**

**yihiin Dulli Adduun iyo Aakhiro oo Cadaab Wayna**), wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{وَلا تَبْغِ الْفَسَادَ فِي الأَرْضِ إِنّ اللّه لا يُحِبُّ الْمُفْسِدِينَ}

(**Hana La doonin Fasaad Dhulka, Eebe ma Jecla Fasaadiyaashee**), wuxuu leeyahay rasuulka:

(خيركُم منْ يرُجى خيرُه ، ويؤمنُ شرُّهُ ، وشرُّكم من لا يُرجى خيرُهُ ، ولا يؤمنُ شرُّهُ)

(**Kiina ugu khayrka badan waa kan khayrkiisa la rajeeyo shartiisana laga nabadgalo, kiina ugu sharta badan waa kan khayrkiisa aan la rajeynin shartiisana aan laga nabadgalin**).

Waxaa ka mid ah sidoo kale: dhibka in loo geysto waddooyinka, waa dambi weyn, wuxuu leeyahay rasuulka:

(لاَ ضَررَ ، وَلاَ ضِرَار)

(**dhib jiro isdhibna ma jiro**), wuxuu leeyahay rasuulka:

(مَنْ آذَى الْمُسْلِمِينَ فِي طُرُقِهِمْ ، وَجَبَتْ عَلَيْهِ لَعْنَتُهُمْ)

(**Qofkii ku dhibo muslimiinta jidkooda lacnadooda ayaa ku dhacayso**).

Waxaa ka mid ah: wax dadka dhexdooda cuqdada ku abuuraya, iyo wixii u keenaya dhib maaddi mise macnawi, sida xanta namiimada jeesjeeska kajanka caayda iyo afxumida iyo waxyaalaha kale oo Islaamka reebay, oona kasoo horjeeda akhlaaqda iyo fidrada

toosan iyo dhaqanka sarreeya oo hormarsan, wuxuu leeyahay rasuulka:

**(إِنَّ أَبْغَضَــكُمْ إِلَــيَّ المَشَّــاؤُونَ بِالنَّمِيمَــةِ المُفَرِّقُــونَ بَــيْنَ الأَحِبَّــةِ المُلْتَمِسُونَ لِلْبُرَآءِ العَنَتَ)**

(**Kuwiina loogu neceb yahay xagayga waa kuwa isku dirka wada oo kala geeya dadka isjecel dadka bariga ahna dhib u raadiya**).

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo iyo barako yeel korkiisa isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan iyo dadkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Camal kaste uu addoonka sameynayo wuxuu leeyahay miro kusoo laabanaya qofka adduun iyo aakhiraba, miraha camalka suubban waxaa ka mid ah: nolosha fiican adduun iyo aakhiro, wuxuu leeyahay Alle:

{مَنْ عَمِلَ صَالِحًا مِنْ ذَكَرٍ أَوْ أُنْثَى وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُ حَيَاةً طَيِّبَةً وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَجْرَهُمْ بِأَحْسَنِ مَا كَانُوا يَعْمَلُونَ}

(**Ciddii camal fasha wanaag oo Raga ama haweena isagoo mu'mina waxaan noolaynaynaa Nolol wanaagsan, waxaana ku abaal marinaynaa Ajirkooda waxa ugu Wanaagsan ee ay falayeen**), waxaa ka mid ah inuu ajarka soconayo geerida kaddib, wuxuu yiri rasuulka:

**( سَبْعٌ يَجْرِي لِلْعَبْدِ أَجْرُهُنَّ مِنْ بَعْدِ مَوْتِهِ وَهُوَ فِي قَبْرِهِ : مَنْ عَلَّمَ عِلْمًا ، أَوْ كَرَى نَهرًا ، أَوْ حفرَ بِئْرًا ، أَوْ غرسَ نَخْلًا ، أَوْ بَنَى مَسْجِدًا ، أَوْ وَرَّثَ مُصْحَفًا ، أَوْ تَرَكَ وَلَدًا يَسْتَغْفِرُ لَهُ بَعْدَ مَوْتِهِ)،**

(**Toddoba ajarkooda addoonka waa u soconaa geeridiisa kaddib asoo qabrigiisa ku jira: qofkii aqoon dadka bara ama webi kireeya, ama ceel qoda, ama timir tilaala ama masjid dhisa ama musxaf dhaxalsiiya ama wiil u dambidhaafaya ka taga geeridiisa kaddib**), waxaa ka mid ah: dhaafidda xumaanta iyo in loo baddalo wanaag, wuxuu yiri Alle:

{وَالَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَنُكَفِّرَنَّ عَنْهُمْ سَيِّئَاتِهِمْ وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَحْسَنَ الَّذِي كَانُوا يَعْمَلُونَ}

(**Kuwa (xaqa) rumeeyay camalfiicanna falay waxaan asturaynaa xumaantooda, waxaana ka abaalmarinaynaa kii u fiicnaa ay camalfali jireen**).

Waxaa ka mid ah: weynida abaalka iyo la saaxiibidda anbiyada iyo siddiiqiinta iyo shuhadada, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{ إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ كَانَتْ لَهُمْ جَنَّاتُ الْفِرْدَوْسِ نُزُلًا }

**(Kuwa rumeeyay (xaqa) oo fala camal fiican waxay u ahaatay jannada firdowso degid, (martiqaad)),** wuxuu yiri Alle:

{ وَمَنْ يُطِعِ اللَّهَ وَالرَّسُولَ فَأُولَئِكَ مَعَ الَّذِينَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ مِنَ النَّبِيِّينَ وَالصِّدِّيقِينَ وَالشُّهَدَاءِ وَالصَّالِحِينَ وَحَسُنَ أُولَئِكَ رَفِيقًا} .

(**Qofkii adeeca Alle iyo rasuulka kuwaasu waxay ahaan lajirka kuwuu u nimceeyay Alle, oo nabiyada, rumeeyayaasha, shuhadada iyo kuwa suubban waxaana u fiican rafiiq kuwaas**).

Siduu u leeyahay camalka suubban miro, sidoo kale camalka xunna wuxuu leeyahay miro korka kaga dhacaya qofka adduun iyo aakhiraba, waxaa ka mid ah: baadinimada iyo jahwareerka iyo qasnaanta, wuxuu yiri Alle:

{أَفَمَنْ زُيِّنَ لَهُ سُوءُ عَمَلِهِ فَرَآهُ حَسَنًا فَإِنَّ اللَّهَ يُضِلُّ مَنْ يَشَاءُ وَيَهْدِي مَنْ يَشَاءُ}

(**Ruuxse loo qurxiyay camalkiisa xun oo u arkay inuu fiican yahay Eebe cidduu doono yuu dhumiyaa Ruuxuu doonana wuu Hanuuniyaa**).

Waxaa ka mid ah: nolo qasan oo aan deganayn, wuxuu leeyahay Alle:

{وَمَنْ أَعْرَضَ عَنْ ذِكْرِي فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً ضَنْكًا}

(**Qofkii ka jeedsada xuskeyga (Quraanka) waxaa u sugnaaday nolol ciriiri ah**).

Waxaa ka mid ah: ayaandarrada maalinta qiyaame, wuxuu leeyahay Alle:

{إِنَّ الَّذِينَ يَأْكُلُونَ أَمْوَالَ الْيَتَامَى ظُلْمًا إِنَّمَا يَأْكُلُونَ فِي بُطُونِهِمْ نَارًا وَسَيَصْلَوْنَ سَعِيرًا}،

(**Kuwa u Cunaya Xoolaha Agoonta Dulmi (Xaq darro) waxay uun ku Cunayaan Calooshooda Naar waxayna Gali Saciiro**), wuxuu leeyahay rasuulka:

(مَن أخذَ مِنَ الأرضِ شَيئًا بِغيرِ حَقِّهِ خُسِفَ به يومَ القيامةِ إلى سبعِ أرضينَ) ..

(**Qofkii dhul si xaqdarro wax uga qaata waxaa lala goynayaa ilaa maalinta qiyaame toddoba dhul**).

Maxaa inooga fiican inaan qabsano waxkastoo khayr oo waxtar leh, iyo inaan ka fogaano waxkastoo shar oo dhib leh, oo aan isugu dardaaranno oo aan isku kaashano xaqa, wuxuu leeyahay Alle:

**{وَالْعَصْرِ * إِنَّ الْإِنْسَانَ لَفِي خُسْرٍ * إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَتَوَاصَوْا بِالْحَقِّ وَتَوَاصَوْا بِالصَّبْرِ} .**

(**Waxaan ku dhaartay waqtiga casarka ah * In Dadku khasaaro ku sugun yahay * Marka laga reebo kuwa**

**rumeeyay xaqa ee Camal fiican fala, isuna dardaarma xaqa, isuna dardaarma Samirka**).

**Ilaahayow waxaan ku weyddiisanaynaa sameynta khayraadka iyo katagidda munkaraadka iyo jacaylka masaakiinta.**

**naguna arsaaq ikhlaaska iyo qabuulka, masarna nooga ilaali wax kastoo xun iyo dhammaan dalalka caalamka**.